



Imanshaha Norway

Å komme til Noreg



 Aamiina

Julie Cornelia van Walsum

 Mohamed Abdirashid

|| 5

 Soomaali  / nynorsk 



LIDA Stories


idastories.net

Imanshaha Norway / Å komme


til Noreg

 Aamiina

Julie Cornelia van Walsum

 Mohamed Abdirashid (so), Espen

Stranger-Johannessen (nn)



This work is licensed under a Creative Commons

[Attribution 4.0 International License.](https://creativecommons.org/licenses/by/4.0)

<https://creativecommons.org/licenses/by/4.0>



Aniga iyo labadayda walaalo waxaan nimid Norway December 2016. Waxaan xirnayn dharka xagaaga, sababtoo ah waxaan u maleynaynay inay kulushahay Norway sida Soomaaliya. Si kastaba ha ahaatee, markii aan nimid garoonka diyaaradaha, waxaa jiray baraf. Waxaana jiray qabow, cimiladuna waa ay qaboobaayd. In kasta oo aannu dhawr boorsooyin wadanay, haddana waxaan wadanay oo keliya dharka xagaaga.


...

Dei to brørne mine og eg kom til Noreg i desember 2016. Vi hadde på oss sommarmlede fordi vi trudde det ville vere like varmt i Noreg som i Somalia. Men då vi kom til flyplassen, snødde det. Vi fraus og vêret var kaldt. Sjølv om vi hadde med oss nokre koffertar, inneheldt dei berre sommarmlede.

Sjóliv om det var kaldt, var eg veldig glad då vi kom til Noreg. Eg kunne endeleg møte mamma att, som eg ikkje hadde sett på seks år. Mamma og to av venninnene hennar møtte oss. Då vi møtte mamma att, gret vi av glede. Mamma bur i ein liten by, så vi køyrde dit.

...

Inkasta oo ay qabow ahayd, aad ayaan ugu farxay markaan Norway nimid. Waxaan ugu dambeyntii la kulmi lahaa hooyaday markale, oo aanaan arag muddo lix sano ah. Hooyaday iyo laba saaxiibadeheed ayaa nala kulmay. Markaan aragnay iyadii ayaannu farxad la ooynay. Waxaan u sii raacnay magaalada yar ee ay hooyo ku nooshahay.






Maalmihii ugu horreeyay ee magaalada hooyo degantahay waxay ahaayeen kuwo la yaab leh. Qabow iyo baraf baa da'ay oo wax badan ma jirin. Waddooyinka ayaa gabi ahaanba faaruq ahaa. Dadka yar ee aan la kulmay waxay u muuqdeen kuwo aamusan oo aan wax saaxiibtinimo lahayn. Soomaaliya waxaa jiray dad meel walba jooga, sidaa darteed wax walba waxa ay dareemayeen si nooc kale ah halkan. Hooyaday iyo saaxiibadeed waxay na siiyeen xoogaa hadiyado ah, ka dibna waxay noo kaxaysay suuqa si aan u soo iibsanno dharka qabowga.

...

Dei første dagane i byen til mamma var veldig merkelege. Det var kaldt, det snødde og det var lite å sjå. Gatene var heilt folketomme. Dei få personane eg møtte, verka kalde og uvennlege. I Somalia er det folk overalt, så alt kjendest uvant her. Mammaa mi og venninnene hennar gav oss gåver, og ho tok oss med for å kjøpe vinterklede.



Haddaan Soomaaliya joogi lahaa, waxaan filayaa inaan hadda hooyo ahaan lahaa. Laga yaabaa in aan hore u yeelan lahaa carruur badan. Haddii aan Soomaaliya joogi lahaa, ma helin fursadaha aan hadda haysto. Waxaan dareemayaa inaan nasiib leeyahay in aan ku noolaado Norway.

...

Viss eg framleis hadde budd i Somalia, hadde eg kanskje vore mor no. Kanskje eg hadde fått mange barn allereie. Viss eg hadde vore i Somalia, ville eg ikkje hatt dei same moglegheitene som eg har fått no. Eg føler meg heldig som bur i Noreg.

Etter juleferien byrja eg på norskkurs på vaksenoppføringsssenteret. Eg gjekk der i to år før eg byrja på ein vanleg skule. No går eg siste året, og eg har fått mange nye venner. Eg er veldig sosial og eg er glad i å møte andre.

...

Kadib fasaxa kirismaska waxaan ku biiray koorxada Norwejiga ee xarunta waxbarashada dadka waaweyn. Waxaan halkaas ku bartay laba sano ka hor intaan bilaa bin iskool caadi ah. Hadda waxaan ku jiraa sannadkii ugu dambeeyay, waxaanan yeeshay saaxiibo badan oo cusub. Waxaan ahay gof bulshaawi ah oo waxaan ka helaa la kulanka dadka kale.



Neste år skal eg byrje på helse- og oppvekstfag på vidaregåande skule. I framtida vil eg bli barne- og ungdomsarbeidar. Når eg er ferdig med utdanninga mi, drøyer eg om å få meg ein fast jobb. Eg vil òg lære å køyre bil og ta førarkort.

...

Sannadka soo socda waxaan bilaabi doonaa iskoolka sare ee qaybta caafimaadka iyo horumarinta dhaliinyarada. Mustaqbalka waxaan rabaa inaan noqdo shaqaale dhaliinyaro ah. Markaan dhammeeyo waxbarashada, riyadeydu waa inaan helo shaqo joogto ah. Waxa kale oo aan rabaa in aan barto darawalnimada oo aan helo shatiga darawalnimada.





Iskoolka ka dib waxaan aadaa xarun ay maamulaan dad iskaa wax u qabso ah halkaas oo aan ka helo caawinta shaqada gurigayga. Waxaan sidoo kale ku biiray koorsada harqaanka ee xarunta.

...

Etter skulen drar eg til Frivilligsentralen for å få hjelp med leksene. Eg har òg byrja på eit sykurs der.



Soomaaliya waligey iskool ma dhigan mana dhigan koorso aan ka ahayn dugsi quraan. Ma aqoonin sida wax loo akhriyo ama loo qoro. Hadda waxaan bartay sida loo qoro af-soomaali iyo af-noorwiiji, iyo maadooyin kale oo badan. Waxbarasho la'aanteed waxaan dareemay inaan qofna ahayn. Hadda waxaan dareemayaa inaan ahay qof aqoon iyo farxad leh.

...

I Somalia fekk eg aldri moglegheit til å gå på skule eller ta eit kurs, bortsett frå koranskule. Eg kunne ikkje lese eller skrive. No har eg lært å skrive på både somali og norsk, og mange andre fag. Utan utdanning følte eg at eg ikkje var nokon. No føler eg meg kunnskapsrik og glad.